

## **Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa**

**Qormadii 10aad**

**Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. ( e-mail: [cabdicaqli@hotmail.com](mailto:cabdicaqli@hotmail.com)).**

Waxaynu qormadii hore ku soo aragnay in Sheikh Madar(AHN) Ilaahay talo saartay, oo uu istikhaaraystay, si Ilaahay ugu dooro goobta uu degayo. Waxaa kale oo aynu soo sharraxnay in goobtaasi Hargeisa noqotay. Sidoo kale, waxaynu soo aragnay in xilligaasi ay goobtan Hargeisa ahayd duur jiq ah oo aan cidi dhex degin kana buuxaan duurjoog iyo ugaadh kala duwani. Waxaa intaasi dheeraa tiyoo aanu dooxa Hargeisa lahayn ceelal qodan oo biyo laga cabo leh, hase ahaatee labada ceel ee ugu dhow, lagana cabbo ahaayeen ceelka Xaraf iyo ceelka Dhogor (Aw Barkhadleh).

Haddii aynu dabagalno xilliga uu sannadkaasi ahaa, waxaa inoo muuqanaya in uu sannadkaasi ku beegan yahay mudadii u dhexaysay sanadihii 1867- 1870. Khilaafka sanadaha yar ahina, waa mid ay ugu wacantahay kala gedisnaanta sanadaha qoraalada la hayo ee aan tixraacay. Sidoo kale, wararka taariikhda afka layskugu gudbiyaa sanado kala duwan oo faraqaasi yari u dhexeeyo, ayay ku tilmaamaan sannadkii uu Sheikh Madar yimid Hargeisa.

Si ay innoogu muuqato xaalada dhabta ah ee uu Sheikh Madar(AHN) la kulmay markii uu yimid Hargeisa, waxaa lagama maarmaan ah inaynu yara lafagurno duruufihii dhabta ahaa ee xilligaasi jiray iyo hab-dhaqankii dadka agagaarka Hargeisa deganaa. Lafagurkaasi ku saabsan xaaladii dhabta ahayd ee ka jirtay agagaarka Hargeisa xilligii uu Sheikh Madar(AHN) yimid, inoo iftiimin mayso oo keliya taariikhda Sheikh Madar (AHN) ee aynu qoraalkeeda ku gudo jirno, ee waa mid inna garansiinaysa taariikhda bulshada Somaliland, guud ahaan, soo martay.

Faa'iidooyinka barashada taariikhdu leedahayna waxaa lagu tilmaamaa in ay si qotodheer inoo garansiiso xaaladda dhabta ah ee aynu maanta ku suganahay. Waayo faa'iidada uu qofku ka helo waayihii uu soo jiray, mid u dhiganta ayay umaduhuna ka helaan cibrooyinka taariikhdii ay soo mareen. Tusaale ahaan, qofka ay ka lunto xasuusta noloshii uu soo jirey iyo aqoontii uu korodhsaday mudadaasi, wuxuu noqdaa sidii dhalaan yar oo barbarad ah ama sidii qof dayeysan oo asqoobay. Sidoo kale, ummadda ay ka daahantahay taariikhdii ay soo martay kama duwana ummad dhalaan ah oo barbarad ah, hawlgalkeeduna yahay mid asqaysan oon kala garanayn dhinaca ay u socoto. Waayo taariikhdu waa wadartii xasuusaha ummadaasi, ee dadkeedu ku kobcinayaan jiritaankooda iyo mustuqbalkooda. Go'aankooda siyaasadeedna wuxuu ku xidhanyahay hadba siday u dareensanyihiin wixii ummadooda soo maray. Taariikhda beenta ah ee cidi iska dhaadhicisaa ama isku maaweelisaana, waxay waxyeelo u keentaa mustaqbalkooda; waxayna ka qarisaan cibrooyinkii laga heli lahaa taariikhdii la soo maray.

Haddii aan dib ugu noqdo nuxurka qoraalkani, xilligii uu Sheikh Madar soo degay Hargeisa, ma jirin maamul dawladeed oo ka taliya dalka Somaliland. Bulshaduna waxay ku dhaqmi jirtay qaab beeled ku salaysan abtirsiin iyo tolnimo. Waxay dadkuna dhaqan jireen geel, adhi, iyo riyo. Taasoo ay kolba u guuri jireen halka ay ka filayaan inay

leedahay biyo iyo baad. Cimilada iyo xilliga la joogo ayaa saamayn xooggan ku lahaa guuritaanka reeraha. Waxayna goobtan Hargeysa iyo agagaarkeedu kulmin jirtay reero iyo qabiilooyin kala duwan oo lagu kala tilmaami jiray reer oogo iyo reer guban. Waxaa kale ooy dhex u ahayd reero ka kala degi jiray bari iyo galbeed. Reeruhu waxay kala lahaayeen ceelasha laga cabbo, hase ahaatee daaqa iyo baadku waxay ahaayeen dan guud oo reeraha goobtan ag dega oo idil ka dhexeeya. Tiiyoo bulshadu ahayd reer guuraa aan meel go'an ku sugnayn, kolba reeraha ugu soo horreeya ayaa ag degi jiray.

Guryaha dadka Somaliland ku noolyihiin waxay ahaayeen aqal soomaali u sahlaya guuritaankan joogtada ah. Haweenka ayaa qaabilsanaa samaynta, raritaanka iyo dhiska aqal soomaaliyada. Sidoo kale waxay haweenku samayn jireen gogosha lagu seexo iyo weelka loo baahan yahay ha ahaado mid cunto iyo mid cabitaanba. Waxaa intaasi u dheeraa raacitaanka adhiga, lisidooda iyo cunto karintaba. Mararka qaarkoodna waxaa u wehilin jiray biyo dhaaminta.

Waxaa ragga u gaar ahaa hawlaha sahaminta, korjoogga, duulaanka, reer oodka, geel raaca iyo liskiisa. Sidoo kale waxay qaabilsanaayeen waraabinta xoolaha iyo biyo dhaaminta. Ragga oo idili waxay wada siteen warmo iyo gaashaamo, kuwaasoo ahaa qaar dalka gudihisa lagu sameeyo. Waxayna badidoodu fuushanaan jireen fardo midabyo badan leh. Taasoo ragga fardaha fuushanina xidhan jireen dhar khayli loo yaqaannay, kuwa lugta ahina xidhan jireen labo go' oo cadcad. Ragga oo idili hubka ayey badanaa ku gaashaanaayeen, iyagoo raaci jiray maahmaahda soomaaliyeed ee ah : “Dagaal gondahaaga ayuu ka dhashaa.”

Haddii aynu isweydiino xilliga ay ku beegnayd waqtigii uu Sheikh Madar (AHN) yimid, waxaa suurtoagal ah, inuu ahaa xilli gu' ah oo roob badani da'yo, waayo wararka afka lay noogu soo tebiyay waxay sheegayaan in ugu horreyntii halkii uu Sheikh Madar (AHN) ka degay Hargeisa ahayd meel ku beegan meesha loo yaqaanno Dabada Cadaadda. Hase ahaatee markii loo adkaysan waayay qaniinyada kaneecada badan ee goobtaasi lahayd, loo soo digo rogtay taagga yar ee xaafadda loo yaqaanno Jameecadu maanta ku taallo oo kaneecadu ku yarayd. Inkastoo guuritaanka reeraha ee ay sababtay cimiladu ay qaar waliba xilli go'an soo ag degi jireen Hargeisa, hadana waxaynu hore u soo sharraxnay in xilliga gu'ga ay reer guubanku u badnaayeen inay soo ag degaan Hargeisa. Haddii hadaba xilligii uu Sheikh Madar (AHN) degay Hargeisa ahaa waqti gu' ah, waxay u dhowdahay in reer guban xilligaasi deganaayeen agagaarka Hargeisa.

Innakoo weli daba soconna iftiiminta waxyaalihii uu Sheikh Madar kala kulmay dadka agagaarkeeda degi jiray bal aynu yara falanqaynno, habka ay u dhaqmi jireen xilliga gu'ga, dadka reer Somaliland. Gugu wuxuu ahaa xilli bashbash iyo barwaaqo reer guuraaga u ah. Waxaa da'i jiray roobabka ugu badan ee sannadkii dalka heli jiray. Taasoo dooguna aad u bixi jiray biyuhuna meelo badan fadhiisan jireen. Taasoo keeni jirtay in xooluhu daaq iyo biyo badan helaan. Waxayna reeruhu ka dhergi jireen caanaha xoolaha kala duwan ee ay dhaqan jireen, tiyoo caanaha geela loogu jeclaa. Dadkana waxaa ka muuqan jiray isbedel iyo koboc jidhkooda ah tiyoo uu xilligaasi u soo noqon jiray miisaankii jidhka ee ay lumiyeen xilligii jiilaalka.

Xilligan gu'ga waxaa aad u badan jiray guurka tiyoo wiilashii iyo gabdhihii xilliga jiilaalka laysku doonay ama laysku meheriyay, ay aqal geli jireen xilliga gu'ga. Waxaa kale oo la kala qaadan jiray amaahdii xilligii jiilaalka laysa sii amaahiyay. Ciyaaraha dhaqanka ayey xilligani wiilasha iyo gabdhuhu si isdaba joog ah isku weydaarsan jireen, tiyoo wiilashu ciyaargudka badin jireen.

Waxaa intaasi dheeraa tiyoo xilligani ay aad u badan jireen shirarka odayada reeruhu iskugu imanayeen, kana wada tashanayaan wixii arrin ah ee soo kordhay. Sidoo kale, waxaa gu'ga aad u badan jiray kulanada diinta la xidhiidha, tiyoo xilligan ay dadka tolka ahi dhigi jireen ducooyinkii iyo siyaarooyinkii awoowyadood. Wuxuuna gu'gu ahaa xilliga loogu jecelyahay in dadka la martiqaado ama culimo deeq loo fidiyo. Sidoo kale waxaa xilliga gu'ga lagu beegi jiray caleemo saarka suldaanka cusub ee reer boqrayo.

Wuxuu sawirkaasi koobani inoo iftiiminayaa in Sheikh Madar (AHN) yimid Hargeisa waqti ku haboon degitaanka meel cusub oo yagleel ah. Waana mid aynu arki karno in duruufihii xilligaasi jiray u sahlayeen inuu dhidibada u taago aasaaka degitaanka Hargeisa. Waana mid inoo muuqata inuu aad uga fekeray go'aanka ku saabsan xilliga uu ku beegayo socdaalkiisa Somaliland. Taasi waxay si dadban inoogu muujinaysaa in uu ku soo talogalay sahayda lagama maarmaanka ah ee bilowga hore ee degitaanka, gaar ahaan, waxyaalihii aan xilligaasi laga helayn Somaliland, ee magaalada Harar yaallay. Waxaana wararka afka layskugu tebiyaa inoo sheegayeen in Sheikh Madar (AHN) watay fardo iyo baqlo badan. Taasoo aynu arki karno in alaabo badan oo sahay lagama maarmaan ah uu watay.

Bal hadaba aynu isweydiinno, maxay ahaayeen tallaabooyinkii ugu horreeyay ee uu qaaday kadib markii uu go'aansaday inuu dego goobtan Ilaahay u dooray ee Hargeisa? Inkastoo ay yaryihiin qoraalada la hayo ee marxaladaasi hore inoo sawiri kara, waxay dadkii qoray qoraaladaasi yimaadeen Hargeisa sanadihii 1880s tiyoo uu Sheikh Madar deganaa Hargeisa muddo dhowr iyo toban sano ah. Laakiinse waxaa jira warar badan oo afka lay noogu soo gudbiyay oo inoo iftiimin kara jawaabta su'aashaasi.

Waxay wararkaasi afka lay noogu soo tebiyay tibaaxayaan in goobtii ugu horreysay ee uu Sheikh Madar (AHN) ka degay Hargeisa ay ahayd meesha loo yaqaanno Dabada Cadaadda. Inkastoo aanu dooxa Hargeisi xilligaasi lahayn ceelal la qoday oo biyo laga gaadhay, hadana waxay ahayd xilli gu' ah oo aad u barwaaqo ah oo biyuhu meel kasta jiiifaan. Talaabadii ugu horreysay ee uu Sheikh Madar (AHN) ku dhaqaaqay waxay ahayd inuu beelaha agagaarkiisa deggan war geliyo inuu goobtan soo degay. Wuxuu Culimadii la socotay oo ka kala tirsan beelo kala duwan, u kala diray inay beelahoodii war geliyaan. Waxaa kale oo uu culimadaasi faray inay iskugu yeedhaan dhamaan culimada beelaha kala duwani inay iskugu yimaadaan goobtan Hargeisa.

Haddii aynu yara falanqaynno faa'iidada talaabadaasi keeni karto; ugu horreyn beesha oo la wargeliyaa waxay u sahlaysay dhammaystirka arrimaha lagama maarmaanka ah ee beeluhu ku taakulayn karaan degitaankiisa. Waxaa kale oo inoo muuqan kara sida ay

talaabadani u fududayn karto himiladii uu Sheikh Madar (AHN) u socday ee ahayd nabadaynta reeraha colaadi ka dhex oogan tahay.

Waxaynu ogsoonahay in Sheikh Madar (AHN) ku soo talo galay inuu si joogto ah u dego meel xarun u noqota dariiqada Qaadariyada ee uu madaxda ka yahay. Sidaynu kor ku soo sheegnayna waxaa jiray qaab ay bulshada Somaliland u qaybsato hawsha, taasoo ragga iyo haweenku kala lahaayeen hawlo kala duwan oo u kala gaar ah. Waxaana muuqata in aanay jirin haween Sheikh Madar (AHN) ka soo raacay Harar. Waxaa intaasi dheer taakulayn badan oo beeshu ka geysan karto degitaankiisa.

Waxaa kale oo inoo muuqan kara sida ay culimo ka kala socda beelo kala duwan oo ku kulma Hargeisa u fududayn karto himiladii uu Sheikh Madar (AHN) u socday ee ahayd nabadaynta reeraha colaadi ka dhexayso. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah inuu kulankani noqdo fursad uu uu ku gaadhsiiyo dhammaan culimada Somaliland himilooyinka uu maaganyahay iyo hawlaha uu ku talo jiro.

Haddii aynu dhinac kale ka eegno, waxaa inoo muuqanaya in arrinkani yahay mid ka duwan arrimihii ay bulshada Somaliland hore u soo arki jirtay ee caadada u ahaa. Waxay bulshadu soo arki jirtay culimo reeraha soo martida oo soo dul degta meelaha guryaha reeruhu ka dhisan yihiin. Sidoo kale, meelaha lagu kulmo, sida magaalooyinka, dekadaha, xeebaha iyo ceelasha, waa lagu arki jiray culimo ama Sheikh soo dhexa dega. Laakiin goob duur jiq, cidlo ah, oon ahayn meel la deganyahay, Sheikh iska dega waa arrin hor leh. Waxaa se ka sii daran tiiyoo beeluhu goobtani u yaqaaneen goob libaaxyo, masas iyo kaneeco looga caagay. Bal aynu aragno sida uu degitaankan Sheikh Madar (AHN), ugu muuqan doono beelaha ag degan goobtan Hargeisa iyo waxay ka yeelaan culimadaasi uu u kala diray beelaha kala duwan. Qormada danbe ayeynu isku dayi in aynu arrimahaasi daaha ka qaadno.